# Casriyeynta Dugsiga Sare ee Benson Polytechnic

## Su'aalaha Badanka La Isweydiiyo

Oktoobar 2021

Mashruuca Casriyeynta Dugsiga Sare ee Benson Polytechnic waxa uu ku suuragalay fadliga taageerada codbixiyeyaasha Portland iyo ka qaybqaadashada dadweynaha ee laxaadka leh ee ay kala qaybqaateen shaqaalaha, ardayda, ardaydii hore, iyo xubnaha bulshada.

**Waa Maxay Sababta Benson Polytechnic loo casriyeynayaa?**
In ka badan 100 sano kadib markii dugsiga asal ahaan la dhisay, casriyeynta dhamayska tiran ee Benson Tech waxa ay dib u habeyn ku samaynaysaa dugsigan taariikh ahaan laxaadka leh iyada oo abuuraysa deegaan caafimaad qaba, adkeysi leh oo casri ah oo loogu talagalay waxbarashada. Dugsiga sida dhammaystiran loo casriyeeyey waxa laga heli doonaa nidaamyo dhisme oo waxtarkoodu sarreeyo; qurxino gudaha ah oo waaraya, nadiif ah oo la joogtayn karo; fasalo, dukaano iyo barxado dadwayne ifaya oo caafimaad qaba: oo ah mid si buuxda loo adeegsan karo (ADA) oo raacaya dhammaan xeerarka khuseeya ee dhismaha iyo badbaadada. Sidoo kale waxa uu noqon doonaa mid furfuran, shaqaynaya oo diiradda saaraya baahiyaha waxbarasho ee taageeraya guusha ardayga iyaga oo la qaabilayo waxqabadyada bulshada ee loo baahan yahay.

**Waa maxay waxyaalaha muhiimka ah ee nashqadda cusub?**

- Albaab wayn oo taariikh ahaan muhiim ah, si fudud loo gali karo lehna barxad xidhan.
- Qaybo cusub oo 2-dabaq ah oo ka koobnaan doonta aagagga waxbarashada ee Waxbarashada Farsamada Mihnadeed (CTE) iyo waxbarashada aasaasiga ah.
- Meelo ardaydu isugu yimaaddaan/kafateeriya ku yaalla badhtanka oo ku xidhiidhsan daarad gudeed taas oo u shaqaysa inay tahay wadnaha dugsiga cusub oo kale.
- Meelo fududaynaya wada-shaqaynta ardayda, shaqada kooxda yar iyo macaamilka bulsheed.
- Xarunta raadiyaha, taawarka iyo dhismaha KBPS ka Benson waa la casriyeyn doonaa.

**Maxaa ku dhacaya dugsiga Benson Polytechnic inta Dhismuhu socdo**?
Baaxadda iyo xajmiga dhismaha dartii, Benson Polytechnic waa la xidhayaa inta ay socoto muddada dhismaha ee saddexda sano ah. Dhammaan bulshada, shaqaalaha iyo ardayda Benson Polytechnic waxa loo beddelay goobo kale inta ay socoto muddada dhismuhu.

**Halkee dugsiyada & barnaamijyada Benson Tech & Multiple Pathways to Graduation (MPG) loo wareejin doonaa inta uu socdo dhismuhu?**
Si sare loogu qaado badbaadada iyo waxtarka mashruuca, dhammaan ardayda iyo shaqaalaha ayaa meelo kale loo raray: shaqaalaha iyo ardayda Benson waxa ay u wareegeen xarunta Marshall ee ku taalla SE 91st Avenue. Dugsiga Sare ee Alliance, Reconnection iyo DART/Clinton waxa ay u wareegeen xarunta Kenton. Ardayda Fiidka & Xagaaga waxa la geeyey Dugsiga Sare ee Grant. Adeegyada PISA (ee loogu talagalalay ardayda ku cusub Degmada) waxa loo raray Dugsiyada Sare ee Roosevelt iyo Leodis V. McDaniel (hore u ahaa Madison) labadaba laga bilaabo sanad dugsiyeedkan.

**Waa maxay sababta Marshall High si kumeel gaadh ah loogu doortay inuu isticmaalo Benson Polytechnic?**
Intii ay socdeen mashaariicda casriyeynta, Franklin, Grant iyo McDaniel (oo hore u ahaan jirey Madison) dhammaan waxa loo raray Xaruntii Marshall ee hore u xidhneyd intii ay socdeen muddooyinkii dhismaha ee 2 da sano ahaa. Iyada oo la eegayo barnaamijka ikhtiyaarka diiradsaaridda CTE ee Benson iyo muddada dhismaha ee 3 da sano ah, aag dukaan oo dheeraad ah ayaa lagu daray Xarunta Marshall si ay u taageerto awoodna u siiso barnaamijyada waxbarasheed ee CTE ee Benson Maalgelinta Barnaamijyada Curaarta ee 2012 & 2017 waxa si gaar ah loogu qoondeeyey si kor loogu qaado Xarunta Marshall.

**Muddo intee leeg ayey ardayda Benson Polytechnic ku sugnaan doonaan Xarunta Marshall?**
Shaqaalaha iyo ardayda Dugsiga Sare ee Benson Polytechnic waxay ku sugnaan doonaan Dugsiga Sare ee Marshall laga bilaabo sanad dugsiyeedka 2021-22 ilaa dhammaadka sanad dugsiyeedka 2023-24. Ardayda waxa la filayaa inay ku soo laabtaan Dugsiga Sare ee Benson Polytechnic oo si buuxda loo casriyeeyey bilawga sanad dugsiyeedka 2024-25 ee deyrta 2024.

**Sidee ayaa ardayda Benson Polytechnic ku tagayaan Xarunta Marshall?**
Sidii ardaydii Madison/McDaniel ee ka horaysay iyaga, ardayda Benson waxa ay yeelan doonaan ikhtiyaaro gaadiid oo kala duwan si ay u gaadhaan xarunta Marshall ee ku taalla 3905 SE 91st Ave. Iyada oo qayb ka ah daraasadda gaadiidka, xuduudka xaadiritaanka Benson waxa loo qaybiyey laba aag, CAGAAR iyo CASAAN, si loo go'aamiyo sida ay ardaydu u isticmaali lahaayeen ikhtiyaarada gaadiidka ee kala duwan si ay u tagaan Kambaska Marshall.

Ardayda ku nool kooxaha Roosevelt, Jefferson, McDaniel (hore u ahaan jirey Madison), Lincoln iyo Ida B. Wells (hore u ahaan jirey Wilson) waxa lagu qaadi doonaa basas dugsi oo huruud ah. Ardayda ku jirta kooxda Cleveland iyo Franklin iyo inta ugu badan kooxda Grant waxa ay adeegsan doonaan basaska TriMet iyo/ama gaadiidka MAX ama gaadiidkooda shakhsiyeed ee gaarka ah. Si aad wax uga ogaato ikhtiyaarrada ardaygaaga oo aad u eegto khariidad muujinaysa aagagga gaadiidka fadlan

Eeg La Talinta Qoyska ee Gaadiidka Tegaya Marshall | Español | Tiếng Việt | Русский | Soomaali | 中文

**Sidoo kale, fadlan ka booqo websaytka Waaxda Gaadiidka si aad u hesho wixii macluumaad ah ee ku saabsan saamaynaha la xidhiidha COVID barta https://www.pps.net/Page/115**

**Sidee baa yaraanta darawallada basku u saameynayaan gaadiidka tegaya Marshall?**
PPS waxa ay wajahaysaa yaraan darawallada basaska ee liisanka haysta ah oo socota. Sidaas darteed, waxa na qabsaday, oo na sii haysan doona, wadooyinka qaar oo ay noqotay in la kansalo iyo kuwo kale oo wakhtiyadii keenista iyo qaadista la beddelay. Waxa aanu qiraynaa in yaraantani ay saameyn laxaad leh ku yeelanayso awoodda ay bulshadeenu u leedahay inay tagto oo ay ka timaaddo dugsiga. Waxa aanu ugu mahadnaqaynaa waalidiintayada, qoysaskayaga iyo ardaydayada akhlaaq wanaagooda iyo sabirkooda inta aanu ku dhex jirno xaaladdan adag. Si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah, fadlan eeg xidhiidhadan u dambeeyey ee qoysaska loo diray: Sibt 17, Sibt 9.

Wixii ah qoysaska Benson iyo Lincoln ee ay saameeyeen kansalidda 13 waddo bas, PPS waxa ay bixinaysaa $300 oo mushahar ah bishii si ay gacan uga geysato taageeridda qaabab kale oo gaadiid oo lagu tago lagagana yimaaddo dugsiga. Halkan waxa ah linkiga aad ku tegayso bogga websaytka Taageerada Gaadiidka Qoyskayaga oo wata faahfaahin dheeraad ah: https://www.pps.net/Page/18193

**Sidee ardaydu u isticmaali doonaan TriMet si ay u gaadhaan Kambaska Marshall?**
Dhammaan ardayda Benson Polytechnic waxay mutaysteen Tigidhka bilaashka ah ee Gaadiidka Ardayga Dugsiga Sare ee Dugsiyada Dadwaynaha Portland. Khadka MAX Green ayaa bixiya ikhtiyaar toos ah oo degdeg ah si loo gaadho xarunta kumeel gaadhka ah. Si aad wax badan uga ogaato MAX iyo waddooyinka baska markaad tagayso Kambaska Marshall, fiiri bogga jadwalka TriMet: *http://trimet.org/schedules/index.htm* ama, haddii aad raadinayso app-ka TriMet ee saxda ah si aad aaladdaada taleefanka ugu shubato, booqo halkan: http://trimet.org/apps/index.htm Barnaamijka Tigidhka Gaadiidka Ardaygu waa iskaashi ka dhexeeya TriMet, PPS iyo Magaalada Portland.

**Miyay basas helayaan hawlaha galabtii iyo kuwa manhajka ka baxsan qaarkood?**
Waaxda Gaadiidka Ardaydu waxay si dhaw ula shaqaynaysaa maamulka Benson si ay u siiso adeeg bas oo xaddidan xaafadaha qaar kadib soo gabagabaynta hawlaha iyo ciyaaraha galabihii.

**Waa maxay sababta dhismayaasha dugsiyada qaar loo casriyeeyey halkii laga baddali lahaa?**
Go'aanka in si buuxda loo casriyeeyo ama gabi ahaanba la baddalo dhisme dugsi waxay ku xidhan tahay da'diisa, ahmiyaddiisa taariikheed, xaaladdiisa, ceebaha iyo xajmiga iyo baahiyaha barxadda barnaamijeed. PPS waxay leedahay dugsiyo xaafadeed oo taariikhi ah oo badan. Dhismayaasha taariikhiga ah waxa loogu dayactirayaa Curaarta Horumarinta Dhismaha Dugsiga qaab waafaqsan ku-talogalka taariikheed ee dhismaha iyo qaybaha dhismaha, iyadoo dhanka kale uu bixinayo jawiyo casri ah oo waxbaris iyo waxbarasho iyo qurxino waaraya oo aan hore u duugoobayn. Macalimiinta, shaqaalaha iyo qoysasku waxay ku lug leeyihiin qorshaynta si ay gacan uga gaystaan ilaalinta sifooyinka goonida ah ee dugsi kasta iyo sida uu ugu milan yahay bulshooyinka ku hareeraysan. Taas waxa dheer, Dugsiga Sare ee Benson Polytechnic waxa lagu tiriyaa in uu yahay Calaamad-dhuleed oo Taariikhi ah oo Portland ah, kaas oo u baahday Dib-u-Eegista iyo Ansixinta Guddiga Calaamadaha-dhuleed ee Taariikhiga ah ee Portland.

**Waa maxay saamaynta shaqada dhismuhu ku leedahay xaafadda ku hareeraysan?**
Si aad u ogaato wax dheeraad ah oo ku saabsan saamaynaha dhismuhu ku leeyahay goobta Benson fadlan **Eeg xaashida xaqiiqda Saameynta Dhismaha Benson**

**Sidee baa ay xubnaha bulshada, ardayda, macallimiinta iyo qoysasku uga qaybqaateen naqshadda cusub?**
Dugsiga Sare ee Benson Polytechnic waxa la naqshadeeyey iyada oo loo marayo hanaano ka qaybgelin bulsheed oo ballaadhan kuwaas oo ay kamid ahayd in xog laga helo degmada, macallimiinta iyo shuraakooyinka shaqaalaha dugsiga, Guddiga Barnaamijka Qorshaynta Benson Polytechnic (MPC) iyo Kooxda La Talinta Naqshadda (DAG) iyo sidoo kale ardayda, qoysaska, jaarka, iyo bixiyeyaasha adeegyada.

Inkasta oo degmada dugsigu ay leedahay yoolal waxbarasho, hagayaal tilmaamo iyo naqshadeed oo caam ah, Benson Tech waa dugsi ikhtiyaar oo diiradda saaraya CTE oo leh baahiyo barnaamij waxbarasheed oo gaar ah. Ardayda habeenkii iyo xagaaga ee Portland sidoo kale waxa ay ku jiraan qorshaynta naqshadda Benson Tech.

Kooxda Talobixinta Nashqadda (Design Advisory Group (DAG)) waxa loo sameeyey mashruuca casriyeynta Dugsiga Sare ee Benson Polytechnic. Kooxda Talobixinta Nashqaddu waxay ka kooban tahay waalidiin, macallimiin, arday, arday hore, iyo bulshada. DAG waxa laga qaybgeliyey marxaladaha naqshadda iyaga oo ra'yi celin siinaya kooxda naqshadda iyaga oo metelaya shuraakooyin ballaadhan.

Marka laga yimaad DAG, macallimiinta, shaqaalaha hawlgallada Degmada, shaqaalaha iyo shuraakooyinka bulshada ee dugsiga Benson waxa ay ahaayeen ilo loo bartilmaameedsaday hanaanka naqshadda. Waxa ay bixiyeen ra'yiyo wax ku ool ah maadaama oo ay garanayeen hawlgallada dugsiga iyo fursadaha ku jira horumarinta labadaba.

**Sidee siminaarada nashqaddu ay fursad ugu siinayaan xubnaha bulshada inay fikrad ku darsadaan?**

Marka laga yimaaddo sibinaarada naqshadda qorshaynta barnaamijka ee dadweynaha ee lagu qabto Benson Tech, waxa jirey booqdayaal joogto ah oo booqan jirey kulannada Guddida Qorshaynta Muhiimka ah (MPC) iyo DAG labadaba. Faallooyinka dadweynaha waxa lagu aqbalay hadal ahaan faallooyinka qoraalka ahna waxa lagu daray qoraalada shirka. Kooxda naqshadda iyo mashruucu sidoo kale waa ay soo xaadireen waxaanay kasoo jeediyeen Bandhigyada Benson Tech ee sanadlaha ah intii lagu gudo jirey naqshadda, ururinta faallooyinka iyo ra'yi celinta intii lagu gudo jirey dhammaan munaasabadahan dugsigu u furnaa booqdayaasha, kuwaas oo caadi ahaan arka boqollaal kamid ah xubnaha bulshada, waalidiinta, booqdayaasha iyo ardaydii hore habeen walba.

**Waa ayo Kooxaha Nashqadda iyo Shaqada Dhismaha?**

Bassetti Architects waa shirkadda naqshadeynta ee loo doortay casriyeynta Dugsiga Sare ee Benson Polytechnic. Laga soo bilaabo 1947, Bassetti Architects waxa ay naqshadaysay goobo dadku ay wax ku bartaan, ka shaqeeyaan, ku ciyaaraan, oo ku xidhiidhaan. Waxa ay aaminsan yihiin in naqshadaynta guusha ugu badan laga gaadho marka uu humaag ka bixinayo yoolalka macmiilka oo qaab laga fekerayna ula falgalayo deegaanka ku xeeran. Hannaanka shirkadda ayaa ah inay la wadaagaan wadashaqayntooda halabuurka leh iyo inay ku biiraan macaamiisha iyo bulshada iyaga oo galaya hanaan dhab ahaan loo dhan yahay isla markaana ay ka go'an tahay heersarreyn.

Andersen Construction waa qandaraasle guud oo Portland ku yaalla, oo qoys leeyahay kaas oo la aasaasay 1950. Shirkaddu si joogto ah ayaa ay u koraysay 70 kii sano ee la soo dhaafay, iyada oo dhistay calaamado-dhuleed oo Portland ku yaalla oo badan oo ay ka mid yihiin Dhismaha Cilmibaadhista Kansarka ee Habeenkii ee OHSU , Dugsiga Sare ee Grant iyo taawarka bukaanka Isbitaalka St. Vincent (dib loo cusboonaysiiyey). Andersen Construction Foundation waa shuraako deeqsi ah oo firfircoon oo leh barnaamijyo bulshada dib wax ugu celiya oo maxalli ah oo badan.

**Sookoobidda Mashruuca Casriyeynta Benson**

Dhismuhu waxa uu u bilaabmay si buuxda si loogu casriyeeyo Benson Polytechnic. Dib u qaabaynta waxa ku jiri doona adkaynta dhulgariirka loogu talagalay ee dhismayaasha taariikh ahaan muhiimka ah iyo sare u qaadid dhammaystiran xagga caafimaadka iyo badbaadada. Qodobada muhiimka ah ee nashqadda qaarkood waxa kamid ah barxadaha iyo tukaamada waxbarashada ee Waxbarashada Mihnadda iyo Farsamada (CTE) oo la cusboonaysiiyey, meelo ardaydu ku kulmaan/kafateeriya oo bartanka ah oo ku xidhan dayrka gudaha, iyo dib u qaabaynta xarunta jimicsiga iyo tiyaatarka. Riix halkan si aad u eegto sawirada naqshadeed ee ugu dambeeyey ee dugsiga cusub.

**Sookoobidda Mashruuca Casriyeynta Benson**

Kambaska oo dhan waxa la nashqadeeyey iyadoo laga duulayo inuu waaro; qaybo fara badan ayaa dib loo adeegsan doonaa, in ka badan 40 geed oo cusub ayaa la beeri doonaa, qalabka tamarta qoraxda ka dhaliyana wuxuu bixin doonaa ugu yaraan 400 kW oo tamarta la cusboonaysiin karo ah. Kambaskan la casriyeeyey wuxuu sii wadi doonaa inuu dhiirigaliyo oo kaqaybgaliyo facyada mustaqbalka ee ardayda Portland ee kala duwan.

Riix halkan si aad u eegto xog-sidaha mashruuca cusub. | Español |Tiếng Việt | Русский | Soomaali | 中文

Si aad u aragto sawir dhaqdhaqaaqaya oo xarunta la casriyeeyey ah, riix halkan

**Sookoobidda Dhismaha Multiple Pathways to Graduation (MPG)**

Hannaanka casriyeynta waxa kamid ah dhismaha dhismaha dhisme cusub oo loogu talagalay Multiple Pathways to Graduation (MPG) oo laga dhiso baarkinka Benson. Wuxuu hoy u noqon doonaa lliance at Benson and Meek, DART/Clinton, Teen Parent Childcare, Reconnection Services & Program. Dhismuhu wuxuu bilaabmi doonaa 2022, xarumaha cusubna waxa la furi doonaa dayrta 2024. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah fadlan booqo websaytka MPG Building at Benson.

**Sideen wax badan uga ogaan karaa mashruuca?**

Si aad u hesho macluumaad mashruuca ku saabsan oo dheeraad ah iyo cusboonaysiinta Benson ee socota waxa aad booqataa bogga websaytka Casriyeynta Benson Tech. Haddii aad qabto su’aalo dheeraad ah ama aad jeclaan lahayd inaad ku biirto liiska boostada mashruuca Benson, fadlan kala xidhiidh xafiiska Casriyeynta Dugsiga barta schoolmodernization@pps.net.